





ICPAC
IGAD Climate Prediction
& Applications Centre

Awdal and Woqooyi Galbeed Regions, Somaliland

Odorasaynta cimilada oo ku
saleysan bilaha Oktoobar-
Nofeembar-Diisambar (OND)
2020



DORASAYNTA OKTOOBAR-NOFEEMBAR-DIISAMBAR (OND) 2020

- Roobabka deyrta ayaa la filayaa guud ahaan in ay yihiin kuwa hooseeya ee gobolka Awdal iyo Waqooyi Galbeed, marka laga reebo dhanka waqooyi oo saadaasheedu caadi tahay.
- Bilowga roobka deyrta ayaan la hubin, macnaheeduna uu yahay uu bilaabanayo.
- Waxaa la saadaalinayaa in bilowga roobka uu soo daahi doono si baahsan dhanka waqooyiga (Gaar ahaan asbuuca koowaad ilaa kan afaraad ee Nofeembar).

TALO BIXINO KU AADDAN WAAXYADA



BEERAHA

- Dawladaha hoose waxaa lagu boorinayaa in ay gacan ku siiyaan beeraleyda (sida bacrimin, abuur) si ay ugu sahlanaato waxsoosaarka beeraha;
- Beeraleyda waxaa lagu diirgalinayaa in ay xili hore qorsheeyaan falashada beeraha
- Beeraleyda waa in ay xiriir la yeeshaan hay'adaha beeraha, oo ay beertaan dalaga mudada yar ku baxa; sida

AWDAL AND WOQOYI GALBEED REGIONS

Odorasynta cimilada oo ku saleysan bilaha Oktoobar-Nofeembar-Diisambar (OND) 2020



galeyda, haruurka & dalaga u adkeysan og abaarta;

- Beeraleyda waxaa lagu boorinayaa in ay la tashadaan wasaaradaha qaabilsan horumarinta beeraha marka ay timaado maareynta cayayaanka inta lagu jiro xiliga abuurka;
- Beeraleyda iyo bulshada waxaa lagula talinayaa in la xiriiraan dawladaha hoose si ay u daryeelaan biyaha iyo carada, kana hortagaan fatahaadaha, hagaajiyaan kanaalada iyo waro biyoodka;
- Wasaaradaha Beeraha & Hey'adaha kale waxaa lagula talinayaa in ay si gaar ah ula socdaan xaalada beeraleyda & in ay gacan ka geystaan taageeradooda si raashin ku filan loo helo;
- Beeraleyda waa in ay iska jiraan aafada ayaxa oo ay wargeliyaan dawladaha hoose iyo hay'adaha horumarinta si ay tilaabo uga qaadaan



XOOLAHA

Xoola dhaqatada beeraleyda ah waa:

- In ay kala meelaystaan hanti dhaqashada/xoolaha si loo helo waraab iyo daaqsan ku filan;
- In ay dhiirigaliyaan abuurka geedaha, cowska iyo dhirta naqa leh, loona daryeelo daaqsinka xoolaha kolka uu roobku da'o;
- In ay xiriir la sameeyaan maamulka dawladda hoose ee xoolaha iyo adeegga caafimaadka si loo xakameeyo cudurada, sida talaal bixin, dawo ku filan, kiimikada disha shilinta iyo gooryaanka;
- In Wasaaradaha Beeraha, Xanaanada Xoolaha iyo Biyaha ay horumariyaan biyaha, warooyinka, berkadaha iyo goobaha ay xooluhu ka cabaan ee miyiga;
- In ay ku dadaalaan maareynta dhulka daaqsinka leh iyo daryeelka deegaanka;



- In ay iskaashi la sameeyaan hey'adaha qaabilsan beeraha iyo xannaanada xoolaha si loo maareeyo xoolaha, kadibna looga hortago khasaaro ku yimaada hantidooda;
- Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo hey'adaha horumarinta waxaa lagu dhiirgalinayaa in ay taageeraan xoola-dhaqatada iyadoo la siinayo nolol-maalmeed iyo hantida oo ay kala meelaystaan, sida maalgashi yar ama hawl ay ku badashaan lacag.

ARAR MUHIIM AH

- **Macluumaadkan waxay salka ku hayaan saadaasha xiliyada Octoobar ilaa Diseembar oo ay soo saartay Waaxda Saadaasha Cimilada.**
- **Saadaashan waxay tilmaameysaa duruufaha jira iyo arrimaha kale ee dhici kara ama aan dhici karin ee la xiriira odoraska roobabka.**
- **Bulashada waxaa lagu boorinayaa in ay la socdaan macluumaadka soo kordhaya ee 10-kii maalmoodba mar soo baxa iyo kuwa billaha ee Waaxda Saadaasha Cimilada.**
- **Saadaashan waxay kale oo cuskan tahay waxyaabaha cimilada la xiriira ee dhici kara mararka qaar, taas oo loo baahan yahay in qorshaha lagu daro hadii uu isbadal yimaado.**
- **Macluumaadkan waa in loo adeegsadaa waaxyaha ay quseeyaan iyadoo ay la jirto saadaasha ay soo saarto Waaxda Saadaasha Cimilada.**

Faahfaahin dheeraad ah, fadlan kala xiriir:

Waaxda Saadaasha Cimilada

TELEPHONE: +252634446546

E-MAIL: abdirashid.jama@hotmail.com, Somaliland Wasaaradda Horumarinta Beeraha ee Somaliland.

E-MAIL: idilhusein01@gmail.com

